# Xuquuqahaaga Waxbarasho

## Waa maxay xuquuqo?

Gudaha Maraykanka, dugsiyada iyo qoysasku waxay ka wada shaqeeyaan si ay uga caawiyaan ilmaha inay wax bartaan oo ay koraan. Waxaa jira sharciyo lagu hubinayo in ilmo kasta helo waxbarasho wanaagsan. Isla xuquuqaha iyo ilaalinta dugsiyada dadweynaha waxay khuseeyaan dhamaan ardayda iyo qoysaska. Ardayda u baranaya Ingiriisiga sidii luuqad cusub waxay leeyihiin ilaalin la xiriirta helitaanka taageerada luuqada iyo inay awood u yeeshaan inay ka qaybqaataan dhamaan hawlaha dugsiga. Xuquuqdani waxay hubisaa in ardaydu helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay u helaan barnaamijyo iyo fursado isku mid ah la siiyo dhamaan ardayda. Ardayda waa in aan laga fogayn hawlaha dugsiga, koorsooyinka, iyo barnaamijyada sababta oo ah waxaa loo tixgeliyaa Arday barta Ingiriisiga.

> Ardayda barata Ingiriisida waa arday keenta heer ka hooseeya heerka aqoonta ee Baaritaanka Aqoonta Luuqada Ingiriisiga ee Ohio (Ohio English Language Proficiency Screener) ama Qiimaynta Aqoonta Luqadda Ingiriisiga ee Ohio (Ohio English Language Proficiency Screener)

Qoysasku waa inay fahmaan xuquuqda ardaydooda. Kadib, waxay baranayaan waxa laga filayo dugsigooda. Waxay hubin karaan inay helayaan waxbarashada ugu macquulsan. Midani waxay ka caawinaysaa ardayda u diyaarinta mustaqbal ifaya.

## Xuquuqda La Xiriiritaanka Dugsiga

Ilmaha aad ayay u guulaystaan marka qoysaska iyo dugsiyadu wada shaqeeyaan. Si midaas loo sameeyo, qoysasku waa inay awoodaan inay fahmaan macluumaadka ay helaan oo ay la xiriiraan dugsiga. Dugsiyadu waa inay hubiyaan in dhamaan qoysaska ay fahmaan macluumaadka ay la wadaagaan. Dugsiyada ama degmo dugsiyeedyada waa inay ku bixiyaan macluumaadka guriga oo ku qoran luuqadda aad doorbidayso.

### Dugsigu waa inuu:

- Bixiyaa tarjumaad lacag la'aan ah iyo tarjumaad munaasabada dugsiga iyo kulamada.
- Waydiiyaa qoysaska luuqada ay doorbidayaan inay isticmaalaan. Dugsigu waa inuu ka codsadaa dhamaan qoysaska diiwaangelinaya ardayda cusub inay dhamaystiraan Sahanka Xog aruurinta ee Isticmaalka Luuqada.

  Sahanka Xog aruurinta ee Isticmaalka Luuqada (The Language Usage survey) waa foom ay dugsiyadu isticmaalaan si ay u bartaan luqadaha ay qoysasku ku hadlaan guriga. Midani waxay ka caawin kartaa dugsiyadu inay hubiyaan inay wadaagaan macluumaadka luuqada qoys kastaa rabo. Waxaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu aqoonsado ardayda laga yaabo inay u baahdaan taageerooyin dheeraad ah oo luuqada Ingiriisiga ah.

  Haddii qoyskaagu guriga ku hadlo luuqad kale, ilmahaaga waxaa laga yaabaa in lagu waydiiyo inuu galo imtixaan si loo hubiyo xirfadahooda Ingiriisiga. Wax badan ka ogaw bogayaga Taageerada Luuqada Ingiriisiga.
- Ku siiyaa foomamka iyo macluumaadka luuqadaha ay qoysasku doorbidaan.

  **Muhiim ah:** Qoyska waxaa laga yaabaa inaysan ku qanacsanayn turjubaanka dugsigu bixiyo. Waxa laga yaabaa inay ka codsadaan dugsiga inuu siiyo turjubaan kale. Dugsiyadu kama codsan karaan ilmaha ama xubnaha qoyska inay u turjumaan dugsiga. In kasta oo qoysasku ay dooran karaan in saaxiib ama xubin qoyska kamid ah ay u noqdaan turjubaan, waxaa muhiim ah in maskaxda lagu hayo in turjubaan aan tababarnayn laga yaabo inuu ka warqabo dhammaan ereyada waxbarasho ee la isticmaalo kuwaas oo kordhin kara is-fahmi waaga xiriirka isgaarsiinta. Ilmaha u tarjuma waalidkood ama qoyskooda waxaa laga yaabaa inay la kulmaan cadaadis iyo walbahaar badan.

Wax badan ka ogaw bogayaga isticmaalka turjubaanka.

## Xuquuqaha Barashada Ingiriisiga

Dugsiyadu waa inay siiyaan taageero dheeraad ah ardayda ay ku adag tahay ku isticmaalka Ingiriisiga dugsiga. Dhamaan dugsiyadu waa inay isticmaalaan nidaam isku mid ah si ay u

ogaadaan ardayda ka faa'iidaysan karta caawimaada luuqada Ingiriisiga ee dheeraadka ah. Ardeydan waxaa loo tixgaliyaa Luuqada Ingiriisiga. Waxaad wax badan ka ogaan kartaa habka iyo sida dugsigu u bixiyo caawimaada luuqada Ingiriisiga markaad booqato bogayaga Taageerada Luuqada Ingiriisiga.

## Waxaa jira sharciyo ku saabsan sida dugsiyadu u taageeraan ardayda loo tixgaliyo Ardayda barata Ingiriisiga:

- Dugsiyadu waa inay hubiyaan xirfadaha luuqada Ingiriisiga ardayda ku adeegsata luuqad aan Ingiriisiga ahayn guriga. Tani waxay ka caawinaysaa inay go'aamiyaan hadii ardaygu ka faa'iidaysan doono helitaanka caawimaad si ay u horumariyaan xirfadahooda Ingiriisiga.

  Dugsigu waa inuu hubiyaa xirfadaha Ingiriisiga ardayda 30 maalmood ee ugu horeeya kadib marka ardaygu dugsiga laga diwaangaliyo. Waxay midan ku sameeyaan inay ardaydu dhamaystiraan Baaraha Aqoonta Luuqada Ingiriisiga ee Ohio. Haddii ardaygu isu-diwaangeliyo ama u badesho dugsiga kadib markii sanad dugsiyeedku bilaabmay, dugsigu wuxuu haystaa 45 maalmood si uu u hubiyo ardayda xirfadahooda Ingiriisiga.
- Dhamaan dugsiyada Ohio waa inay isticmaalaan imtixaan isku mid ah si loo hubiyo xirfadaha Ingiriisiga ardayda. Natiijada imtixaanka waa in lala wadaagaa qoysaska.
- Dugsigu waa inuu qoyska la socodsiiyaa haddii ardaygoodu keeneen dhibco ka hoosaysa Heerka Aqoonta Sare ee Imtixaanka Ingiriisiga ee lagu hubiyo xirfadahooda. (Imtixaanka Ingiriisku wuxuu noqon doonaa Baaraha Aqoonta Luuqadda Ingiriisiga ee Ohio ama Qiimaynta Aqoonta Luqadda Ingiriisiga ee Ohio.)
- Qoysasku waxay go'aansadaan haddii ay rabaan in ilmahoodu helaan taageerada luuqada Ingiriisiga iyo in kale.
- Taageerada luuqada Ingiriisiga way kala duwanaan kartaa, laakiin dugsiyadu waa inay hubiyaan inay ardayda ka caawiyaan inay bartaan Ingiriisiga.
- Ardeyda loo tixgalinayo inay yihiin Arday barata Ingiriisigu waa inay helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay u bartaan dhamaan maaddooyinka kale ee Ingiriisiga lagu dhigo

[Copyright] ©2024 Center on Education and Training for Employment, The Ohio State University 

dugsiga.

- Ardaydu waa inaysan ku celin isla fasalka sababtoo ah waa Arday barata Ingiriisi ah. Dugsigu waa inuu tixgeliyo horumarka guud ee waxbarasada ardayga. Waa inay sidoo kale tixgeliyaan fikradaha macalimiinta iyo qoyska.

## ka diwaangalinta Dusiga

Waxaa jira xuquuqo gaar ah marka laga diwaangalinayo ardayda dugsiga. Ka ogaw wax badan oo ku saabsan diiwaangelinta bogayaga diiwaangelinta.

Dhamaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan dugsiga dadweyne. Taariikhda ardayga ma bedelaan xaqan. Midan waxaa ku jira luuqada hooyo ama xirfadaha Ingiriisiga.

### Dugsigu waa inuu:

- Siiyaa macluumaadka ku saabsan diiwaangelinta qoysaska. Waa inay ku qornaataa luuqada ay qoysasku sida ugu fiican u fahmeen. Midan waxaa kamid ah dhukumiintiga qoraalka ah.
- Sii turjumaan si uu uga caawiyo qoysaska inay la hadlaan dugsiga.
- Isla markiiba diwaangaliyaan ardayda ay haysato hoy la'aanta. Xitaa haddii qoysku uusan bixin karin cadaynta degenaanshaha.
- Dugsigu ma daahin karo diiwaangelinta sababto ah xaalada daryeelka guriga ama korinta awgeed.

  Booqo boga Taageerada Ardayga ee websaytka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha Ohio si aad wax badan uga ogaatid.

### Qoysasku waa inay bixiyaan:

- Cadaynta da'da ilmaha
- Dhukumiinti muujinaya in qoysku ku nool yahay degmada dugsiga ku yaala

  Qoysasku waa inay bixiyaan dhukumiinti muujinaya halka ay ku nool yihiin. Ardayda iyo qoysaska ay haysato hoy la'aantu waxay heli karaan ikhtiyaaro kale.
- Diwaanada talaalka

## Ilaalinta Asturnaanta Qoyskaaga

Dugsiyadu waa inay ururiyaan macluumaadka ku saabsan dhamaan ardayda iyo qoysaskooda. Tani waxay ka caawinaysaa dugsiyadu inay hayaan diiwaano sax ah. Dugsiyadu waxay u isticmaalaan macluumaadkan si ay u siiyaan warbixinada dawlada oo ka caawisa dugsiyada inay si wanaagsan ugu adeegaan qoysaska.

> **Muhiim ah:** Dugsiyadu waa inay wadaagaan oo keliya macluumaadka gaarka ah ee ardayga marka sharcigu u baahan yahay. Qoysku sidoo kale waxay siin karaan ogolaanshaha dugsiga inay la wadaagaan macluumaadka mid kale. Dugsiyadu ma waydiisan karaan qoysaska inay xaqiijiyaan xaaladooda socdaalka. Qoysasku ma aha inay dugsiyada siiyaan dhukumiinti socdaalka ama lambarada sooshal sukuuratiga.

### Macluumaadka gaarka ah ee ay tahy in dugsigu ilaaliyo:

- Macluumad shakhsi ahaaneed ee ardayga ama qoyska khatar gelin karta – Tan waxaa ku jira aqoonsiga ardayga, lambarada sooshal sikuuratiga, sawiro, ama macluumaad kale.
- Xaaladda socdaalka ee ardayga ama xubnaha qoyska – haddii qoysku doorto inay macluumaadkan la wadaagaan dugsiga
- Taariikhaha dhalashada
- Goobta ardayda ku dhalatay
- Cinwanka deegaanka qoyska
- Macluumaadka qoyska ee xiriirka xaaladaha degdega ah
- Diiwaanada koorsooyinka lasoo dhammeeyay iyo waraaqaha natiijada
- Warqaaha rasmiga ah ee ku saabsan xaalada ardayga ee dugsiga
- Diwaanada anshaxa
- Diwaanada caafimaadka iyo caafimaadka ee dugsiga
- Macluumaadka soo xaadiritaanka
- Macluumaadka ku saabsan dugsiyadii uu ardaygu horay usoo dhigtay

## Ka qaybqaadashada Barnaamijyada iyo Hawlaha kale ee Dugsiga

**Dugsiyadu kama saari karaan ardayda iyagoo ku salaynaya kaliya faseexnimada ay ugu hadlaan Ingiriisiga.** Dhamaan ardaydu waa inay helaan fursad isku mid ah oo ay ugu biiraan barnaamijyada iyo hawlaha. Midn waxaa kamid ah ardayda loo tixgaliyo Ardayda barata Ingiriisiga.

> Tusaale ahaan, la-talinta dugsiga, isboortiyada, barnaamijyada farshaxanka, iyo hawlaha kale ee uu bixiyo dugsigu ee ka baxsan wakhtiga fasalka ayaa ardayda ka caawiya inay guulaystaan.

Dugsiyadu waa inay hubiyaan in qaabka ardayda loogu soo xulayo barnaamijyada iyo hawlaha kale ee dugsiga inay yihiin mid cadaalad ah.

### Waxbarashada Gaarka ah

Ardayda qaarkood ayaa laga yaabaa inay u baahdaan adeegyada waxbarashada gaarka ah hadii ay la kulmaan dhibaato waxbarasho.

Midn waxaa kamid ah ardayda loo tixgaliyo Ardayda barata Ingiriisiga. Qof kastaa ayaa ka codsan kara dugsiga inuu qiimeeyo ardayga waxbarashada gaarka ah. Tan waxaa ku jira waalidiinta, daryeel bixiyayaasha, xubnaha qoyska, macalimiinta, iyo shaqaalaha kale ee dugsiga. Ardayda ayaa sidoo kale isa soo gudbin kara.

### Dugsigu waa inuu:

- Go'aanso haddii ilmuhu naafo yahay. Midan waxa lagu sameeyaa qiimayn. Qoyska ama shaqaalaha kale ee dugsiga ayaa laga yaabaa inay u maleeyaan in ardaygu ku adag yahay waxbarashada.
- Dhamaystir qiimeynta dhamaan qeybaha baahida luuqada uu ilmuhu doorbido. Xaaladaha qaarkood, turjubaan ayaa loo baahan yahay.
- Siiyaan macluumaadka qoysaska luuqada ay doorbidaan. Bixiyaan turjumaad lacag la;aan ah sida loogu baahdo.
- aSameeyaan qorshe lagu daboolayo baahida ardayga. Qorshuhu waa inuu tixgeliyo

baahida luuqada ardayga. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay ardayda Ingiriisiga barta ama hela caawimaad si ay u horumariyaan xirfadahooda Ingiriisiga.

Booqo boga Qoysaska Leh Arday Naafo ah ee websaytka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka waxbarashada gaarka ah.

## Waxbarashada Ardayda Hibada leh

Arayda barata Ingiriisiga ee soo bandhiga heerar aqoonta sare ee ardayda ay isku fasalka ahaayeen waxa laga yaabaa inay u qalmaan adeegyada waxbarashada ardayda hibada leh.

- Ardayda loo tixgaliyo inay yihiin Arday barata Ingiriisiga waxay xaq u leeyihiin inay ka qaybqaataan adeegyada ardayda hibada leh ee dugsigu bixiyo.
- Dugsiyadu kama saari karaan ardayda iyagoo ku salaynaya kaliya faseexnimadooda Ingiriisiga.
- Dhamaan ardayda loo soo gudbiyo aqoonsiga hibada dugsiga waa in laga qaadaa imtixaan. Imtixaanku wuxuu muujinayaa inay heli karaan adeegyo ardayda hibada leh. Dugsigu wuxuu haystaa 90 maalmood oo uu imtixaan kaga qaado ardayga.
- Qof kastaa ayaa ka codsan karaa dugsiga inuu ardaygu imtixaan uga qaado waxbarashada ardayda hibada leh. Tan waxaa ku jira waalidiinta, daryeel bixiyayaasha, xubnaha qoyska, macalimiinta, iyo shaqaalaha kale ee dugsiga. Ardayda ayaa sidoo kale isa soo gudbin kara.

Booqo Boga Baaritaanka iyo aqoonsiga Ardayda Hibada leh ee websaytka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha Ohio (Ohio Department of Education and Workforce's Gifted Screening and Identification page) si aad wax badan uga ogaatid.

## Waxbarashada Fogaan araga ah

Xuquuqda waxbarashada ardaydu waa isku mid marka ardaydu khadka onlaynka ah wax ku baranayso. Ardayda wax ku baraneysa khadka fogaan araga ah waa inay helaan taageero la mid ah wax ku baritaanka luqadda sida ay u heli karaan si shakhsi ahaan dugsiga.

Wax badan ka ogaw bogayaga waxbarashada fogaan araga.

## Badqabka Dugsiga

Ohio gudaheeda, dugsiyadu waa inay dhamaan ardayda ka ilaaliyaan u xog sheegashada. Midan waxaa mid ah waxyeelaynta jir ahaaneed iyo si xun loola dhaqmo dugsiga. Midani waxay khusaysaa ardayda loo tixgaliyo inay yihiin Arday barata Ingiriisiga. Dugsiyadu waa inay qaadaan talaabooyin looga ilaalinayo ardayda la u xoog sheegashada. Waa inay ka joojiyaan ardayda inay si xun ula dhaqmaan dadka kale.

Waxay sidoo kale kasoo wici karaan Safer Ohio School Tip Line lambarka 844-723-3764. Waa kheyraad badqab leh oo lacag la'aan ah oo ay heli karaan dhamaan dugsiyada Ohio. Khadka tip line waa nidaam wargelin oo qarsoodi ah kaas oo aqbala talooyinka wicitaanka, qoraalka, qaabka websaytka, iyo barnaamijka abka talefoonka 24 saacadood maalintii. Wax badan ka ogaw websaytka Ohio School Safety Center.

## Maxaa dhacaya haddii dugsigu uusan raacin shuruudahan?

- Qoysaska iyo dugsiyadu waxay si wadajir ah u xalin karaan dhibaatooyin badan. Haddii qoysku u maleeyo in dugsigu uusan buuxinin shuruudihii looga baahnaa ama uusan ula dhaqmin si cadaalad ah, waa inay marka hore kala hadlaan dugsiga. Waa inay ka wada hadlaan sidii dugsigu u taageeri lahaa ardaygooda.
- Qoysku waxay caawimaad ka codsan karaan xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga, sida macalinka Luuqada Ingiriisiga.

  Macalinka BarioIngiriisiga sidii Luuqad aan ahayd mida guriga (Teaching English as an Other Language, TESOL) ama macalin Ingiriisi ee Luqad Labaad ahaaneed (ESL, English as a Second Language), xiriiriyaha qoyska ama la-taliyaha dugsiga ayaa ku caawin kara.
- Haddii arintu sii socoto, qoysku waxay la xiriiri karaan maamulaha dugsiga.

  Maamulayaasha waxay kormeeraan dugsiyada iyo dhamaan shaqaalaha dhismaha.
- Haddi qof dugsiga ka tirsani uusan ku caawin, qoyska waxa laga yaabaa inay la kulmaan maamulaha degmada.

Maamulaha degmada ayaa mas'uul ka ah adeegyada Luuqada Ingiriisiga ee dhamaan dugsiyada degmada.

- Qoysasku waxay sidoo kale kala xiriiri karaan Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) si ay caawimaad uga helaan lau@education.ohio.gov.

Haddii qoysku uusan si toos ah u xalin karin arimaha dugsiga, waxay la xiriiri karaan xafiisyada dawlada Maraykanka. Xafiisyadani way caawin karaan ardayda barata Ingiriisiga iyo qoysaskooda.

### Qoysasku waxay la xiriiri karaan:

- Xafiiska Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka ee Xuquuqda Madaniga (OCR, United States Department of Education's Office for Civil Rights) wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xaraynta cabasho.
- Waaxda Caddaalada ee Mareykanka ee Waaxda Xuquuqda Madaniga (United States Department of Justice's Civil Rights Division) wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xaraynta cabasho.

Waxyaabaha la xiriira waxbarashada gaarka ah ama waxbarashada ardayda hibada leh, qoysasku waxay kaloo lasoo xiriiri karaan Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha Ohio (Ohio Department of Education and Workforce). Qoysasku waxay cabasho ka xaraysan karaan khadka onlaynka ah ee websaytka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio (Ohio Department of Education and Workforce).

## Su'aalaha Aad Waydiin Karto

- Fadlan ma sharaxi kartaa waxa ay yihiin xuquuqaha waxbarashada iyo sababta ay muhiim u yihiin?
- Haddii aan qabo walaacyo ama su'aalo ku saabsan xuquuqda waxbarashada ilmahayga, yaan la xiriiri oo sidee ayay ii caawin karaan?
- Sideen u hubin karaa in ilmahayga xuquuqdiisa waxbarasho lagu ixtiraamo oo lagu

ilaaliyo dugsigan?

- Sidee ayuu dugsigu u hubin doonaa in ilmahayga si siman u heli karo fursadaha waxbarasho, iyadoon loo eegayn taariikhda luuqadooda?
- Ma jiraan barnaamijyo ama adeegyo gaar ah oo la bixiyo si looga caawiyo ardayda ku hadasha luuqadaha badan inay ku guulaystaan tacliin ahaan?
- Xeelado noocee ah ayay macalimiintu isticmaali doonaan si ay u taageeraan waxbarashada ilmahayga iyo fahamka maadooyinka marka Ingiriisku aanu ahayn luuqadooda hooyo?
- Sideen uga qaybqaadan karaa ka waalid ahaan taageerida iyo u doodista xuquuqda waxbarashada ilmahayga ee dugsigan?

## Kheyraad Dheeraad ah

### Xuquuqaha Qoyska

- Waxaad wax badan ka ogaan kartaa qeybta "Attending School in the United States" ee NCELA Family Toolkit marka aad doorato Cutubka 2. Waxa lagu heli karaa afar luqadood (Ingiriis, Carabi, Shiinays, iyo Isbaanish). https://ncela.ed.gov/educator-support/toolkits/family-toolkit
- USA Hello waxay bixisaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda qoyska iyo sharciyada kale ee waxbarashada. https://usahello.org/education/children/education-law-and-rights
- Xafiiska Xuquuqda Madaniga ahi wuxuu bixiyaa xaashi xaqiiqo ah oo ay ku qoran tahay macluumaadka ku saabsan xuquuqda qoysaska iyo Ardayda Barta Ingiriisiga. https://www2.ed.gov/about/offices/list/ocr/docs/dcl-factsheet-el-students-201501.pdf
- USA Hello waxay bixisaa macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqda soo galootiga iyo qaxootiga. https://usahello.org/immigration/your-rights
- Warqada xaqiiqda ee Education Law Center waxay bixisaa guudmar ku saabsan xuquuqda Ardayda barata Ingiriisiga iyo qoysaska ardayda leh aqoon Ingiriisi oo kooban.

https://www.elc-pa.org/resource/rights-of-english-language-learners-families-with-limited-english-proficiency

## Xiriirka ka Dhexeeya Qoysaska iyo Dugsiyada

- Colorin Colorado waxay bixisaa lifaaqyada xaashida xaqiiqda ee Waaxda Waxbarashada Mareykanka. Waxay ka jawaabaysaa su'aalaha caadiga ah ee ku saabsan xuquuqda qoysaska aan si fiican ugu hadlin, u fahmin, u akhrin, ama u qorin Ingiriisiga sababtoo ah maaha luuqadooda hooyo. https://www.colorincolorado.org/guide/fact-sheet-information-limited-english-proficient-parents-and-schools-and-school-districts

## Badqabka

- Waxay sidoo kale kasoo wici karaan Safer Ohio School Tip Line lambarka 844-723-3764. Waa kheyraad badqab leh oo lacag la'aan ah oo ay heli karaan dhamaan dugsiyada Ohio. Khadka tip line waa nidaam wargelin oo qarsoodi ah kaas oo aqbala talooyinka wicitaanka, qoraalka, qaabka websaytka, iyo barnaamijka abka talefoonka 24 saacadood maalintii. Wax badan ogaw websaytka Ohio School Safety Center. https://ohioschoolsafetycenter.ohio.gov/pre-k-12-schools/safer-ohio-school-tip-line
- Waxaad wax badan ka ogaan kartaa qeybta “The Health and Safety of Your Child at School” ee NCELA Family Toolkit marka aad doorato Cutubka 5. Waxa lagu heli karaa afar luqadood (Ingiriis, Carabi, Shiinays, iyo Isbaanish). https://ncela.ed.gov/educator-support/toolkits/family-toolkit
- Ka ogaw wax badan oo ku saabsan ka ilaalinta ardayda u Xoog sheegshada websaytka Colorin Colorado. https://www.colorincolorado.org/article/8-tips-protect-ells-bullying-your-classroom-and-school

## Waxbarashada Gaarka ah

- Hagitaanka Waaxda Waxbarashada Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) iyo Shaqaalaha ee xuquuqda waalidka u leeyahay bixinta macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda qoysaska waxbarashada gaarka ah. https://education.ohio.gov/Topics/Special-Education/A-Guide-to-Parent-Rights-in-

Special-Education

- Websaytka Waaxda Waxbarashada Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) iyo Shaqaalaha wuxuu bixiyaa macluumaad dheeraad ah oo qoysaska ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee Ohio. https://education.ohio.gov/Topics/Special-Education/Families-of-Students-with-Disabilities

*Khayraadkan waxay ujeedadoodu tahay inay xoojiyaan tacliinta, fayo-qabka ardayda iyo kuliyada iyo natiijooyinka shaqada ee ardayda luuqadaha badan ku hadla ee Ohio. Khayraadka waxaa lagu sameeyay dadaal iskaashi oo u dhexeeya Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) iyo Ohio State University's Center on Education and Training for Employment oo ay weheliso koox u heelan oo u doodaha qoyska, hogaamiyeyaasha bulshada, shaqaalaha dugsiga degmada, iyo macalimiinta.*

[Copyright] ©2024 Center on Education and Training for Employment, The Ohio State University 